# Gobolka San Diego

**ADEEGYADA QORSHAYNTA &**
**HORUMARINTA**
5510 OVERLAND AVENUE, SUITE 310, SAN DIEGO, CA 92123
(858) 694-2962 • fAKIS(858) 694-2555
www.sdcounty.ca.gov/pds

MARK WARDLAW
AGAASIMAHA

KATHLEEN A. FLANNERY KAALIYAHA
AGAASIMAHA

Sebtember 25, 2019

Macaamilka Qaaliga ahaaw,

Dadaal gacan looga geysanayo dhibaatada guriyeynta, Degmada San Diego waxay samaysay qorshayaal dhisme oo horay loo ansixiyay oo loogu talagalay Qaybaha Deganaanshaha Dheeraadka ah (ADUs). Qorshayaashan ayaa la naqshadeeyey laguna sameeyey dib u eegis si loo xaqiijiyo in shaqaalaha ay u hogaansamaan Xeerka Dhismaha California. Qorshayaashan waxaa lagu siiyaa macaamiisha lacag la'aan. Waxaa loo qorsheeyay inay ka shaqeeyaan meel kasta oo ka mid ah bulshooyinka aan la wadaagin ee Degmada San Diego. Laba qaybood oo qorshayaal ah ayaa wakhtigan la dhammaystiray, mid waxa loogu talo galay guri 600 fiit oo laba jibbaaran ah, midna waa guri 1,200 fiit oo laba jibaaran ah. Cabirrada iyo qaabaynta dheeraadka ah ayaa la horumarin doonaa inta lagu jiro sanadka oo dhan.

Maadaama guri kastaa uu gaar yahay, qorshayaashani waxay dhamaystiran yihiin ku dhowaad 85%. Waxay u taalaa milkiilaha guriga gaarka ah inuu dhamaystiro qorshooyinka, iyadoo lagu saleynayo goobta gaarka ah. Waxaa la filayaa in macaamiil badani ay qaadan karaan qorshayaashan si ay ula shaqeeyaan qandaraasle ama xirfadlayaal kale si ay u dhamaystiraan qaybaha yar ee haray.

Waxaan fahamsanahay in qorshooyinka iyo foomamka la bixiyay ay noqon karaan kuwo adag haddii aadan aqoon u lahayn geedi-socodka dhismaha. Waxaan halkan u joognaa inaan ku caawinno. Waxaan samaynay websayd ay ku jiraan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ADU-yada https://www.sandiegocounty.gov/ADU. Haddii aad jeclaan lahayd inaad nala hadasho, waxaanu diyaarinay khad taleefoo oo loogu talagalay su'aalaha guud (858) 495-5382. Waxaan hubin doonnaa fariimaha maalin kasta, waxaana ku soo celin doonnaa wicitaannada 24 saacadood gudahood. Waxaa sidoo kale nalaga heli karaa iimaylka PDS.ADUquestions@sdcounty.ca.gov, ama waxaad nagu soo booqan kartaa halkan xafiiskayaga.

Foomka halkaan ku lifaaqanPDS 607 ayaa kaa caawin doona inaad dhamaystirto qorshayaasha si ay diyaar ugu ahaadaan ansixinta kama dambaysta ah. Qaar ka mid ah shaqada weli u baahan doona in la dhammaystiro waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda ee ku xiran goobta gaarka ah iyo jihaynta ADU:

- Qorshaha goobta (Foomka PDS090)
- Heerka Hababka Maareynta ugu Fiican ee Stormwater SWQMP
- Xisaabinta tamarta (Calcerts) - -
- Nakhshad truss ee ka timid soo saaraha truss ee ku salaysan qorshayaasha degmada.

Aalad laga yaabo inay waxtar leedahay, waa warbixinta hantiyeed ee kooban ee loogu talagalay qaybtaada. Warbixintani waxay ku siin doontaa macluumaad guud oo kaa caawin doona tillaabooyinka xiga ee ku aaddan oggolaanshaha ADU (ama dhismaha). Warbixintan waxaa laga heli karaa websaydka soo socda:

https://publicservices.sdcounty.ca.gov/CitizenAccess/

Liiska ka soo hoos baxa "warbixinaha" ee ku yaala geeska midig ee kore waxaad ka dooran doontaa Warbixinta Kooban ee Hantida. Linkiga ku lifaaqan ayaa ku geyn doona hage kaa caawin doona helitaanka APN-gaaga iyo raadinta warbixintaa kooban ee hantidaada.

Waxaad u baahan doontaa inaad isku duwarid samayso oo aad la hadasho dhawr kooxood oo kale intaad hore ugu sii socoto qorshayaasha Degmadu ansixisay:

- Maamulka Dab-demiska ee deegaanka - Fadlan kala tasho maamulka dab-damiska ee deegaankaaga si aad u ogaato wixii shuruudo ah oo suurtogal ah ama wixii xaddidaad dib u dhigeed ah oo khuseeya hantidaada.
- Waaxda Caafimaadka Deegaanka (DEH) - Haddii gurigaagu uu ku jiro nidaamka septic-ka fadlan la xirir Waaxda Caafimaadka Deegaanka si aad ugala hadasho baaxada guriga iyo suurtogalnimada ah in gurigaaga uu taageero shuruudo kale oo septic-ga ah.
- Degmooyinka Dugsiyada Maxaliga ah - Waxaa laga yaabaa inay jiraan kharashyo dheeraad ah oo ku aadan dhisida guriga cusub. Degmo dugsiyeed walba way ka duwan tahay degmooyinka kale. Fadlan tixraac ku sameey dugsiyada degmadaada si aad u xaqiijiso kharashaadkooda.
- Degmooyinka Biyaha - Waxaa laga yaabaa inay jiraan shuruudo ama kharashyo ay kaaga baahan yihiin adeegyada biyada ee degmadaada. Fadlan la xiriir iyaga si aad u kala ogaato khidmadahan iyo shuruudahan.

Qorshayaasha degmadu bixinayso waxa laga yaabaa in aanay ahayn waxa aad adiga raadinayso, laakiin waxa ay ku siin karaan fahamka ku aadan sida uu u ekaan doono qaabka soo gudbinta dhismaha. ADU-yadaan waxay isticmaali doonaan habka qaabaynta caadiga ah ee gidaarada tiirarka leh. Haddii mashruucaagu aad u adag yahay, waxaa laga yaabaa inaad u baahato injineer ama naqshadeeye si uu u naqshadeeyo hababka taageerada tooska ah iyo kuwa dambe ee gaarka ah. Qorshayaasha degmada waa la bedeli karaa laakiin waxay u baahan doonaan in dib u eegis lagu sameeyo si wax looga bedelo ama isbedelo loogu sameeyo.

Marka laga soo tago bixinta qorshayaashan ADU ee horay loo qorsheeyay, degmadu waxay sidoo kale ka tanaasulaysaa khasab ka dhigida ogolaanshaha ADU iyo kharashaadka saamaynta horumarinta ilaa muddo shan sano ah, taas oo soo bilaawatay Janaayo 9, 2019. Tan waxa ku jira ka tanaasulida khidmadaha saamaynta dhismaha (Saamaynta Gaadiidka, Xeerka Bixinta Dhulka Jardiinooyinka, iyo Biyo-mareenka), iyo sidoo kale khidmadaha oggolaanshaha (nidaamka biyaha wasakhda ah ee dhismaha iyo goobta) ee ADU-yada ee ku yaala meelo badan oo leh guryo hal qoys keliya loogu talagalay.

Daacad kuu ah,

DENNIS HOWE, Madaxa Waaxda Qorshaynta
Dhismayaasha & Adeegyada Horumarinta